

Taageero dhaqaale: Weerarkii Masaajidka Christchurch

Laga bilaabo 3da Juun 2019, waxaan taageero dhaqaale u sahlaynaa dad badan oo uu saameeyay weerarkii masaajidka.

Haddii aadan heli karin dakhli dhaqaala oo kuugu filan si aad u bixisid waxyaabaha adiga iyo qoyskaaga aad u baahan tihiin, uuna ku saameeyay weerarka, waxaan halkaan kuugu haynaa sida aan kuugu caawin karno.



Waxaan heystaa Dal ku gal ka Jawaabidda Christchurch

Haddii add heystatid Kaarka Fiisaha ee ka Jawaabidda (weerarkii) Christchurch, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheef lacageed oo muhiim ah iyo taageero dhaqaale oo kale. Uma baahnid inaad ahayd qof deganaa New Zealand mudo labba sano.

Waxaa ka mid ah dadka haysta deganaasha joogta ah islamarkaana degaana New Zealand in ka yar mudo laba sana ah oona heli kara ama u qalma Dal ku gal ka Jawaabidda.

Waan u qalmaa inaan helo Fiisaha ee ka Jawaabidda (weerarkii) Christchurch

Haddii aad u qalantid Fiisaha ka Jawaabidda Dhacdadii Christchurch, waxaa laga yaabaa inaan ku siin karno lacagaha cusub ee ay bixiso Wasaaradda Horumarinta Bulshada ee (MSD).

Dulmar xogta hoose.

Uma qalmi inaan helo Kaarka Fiisaha ee ka Jawaabidda (weerarkii) Christchurch

Haddii:

- aad halkaan ku joogtid fiisa xili ku meel gaar ah, **iy**
- aad xiriir dhow laleedahay qof ku sugnaa goobta weerarka, ama dhintay ama dhaawacmay weerarka masaajidada awadood,

waxaa laga yaabaa inaad u qalanto helitaanka Lacagaha Christchurch ee ay Bixiso Wasaaradda Horumarinta Arimaha Bulshada (MSD). 'xiriir dhow inaad lalahaatid' waxaan ka wadnaa inaad tahay lamaanhooda, waalid ama qof weyn oo kugu tiirsan ama canug (aan toos kuugu tiirsaneen) walaal ama ilma yar.

Dulmar xogta hoose.

Xiriir ayaan la leeyahay masaajidda ama Bulshada Muslimiinta Christchurch waxaana dareemayaa cabsi ama walwal sababtoo ah weerarka

Haddii:

- aad ka mid tahay ama aad xiriir la leedahay, labbada masaajid ama Bulshada Muslimiinta Christchurch, **iy**
- amaa joogtay NZ maalintii 15-ka Maarso 2019, **iy**
- aad dareemaysid xanuun dhanka maanka ah weerarka awadiis,

waxaa la yaabaa inaad inaad u qalanto lacag bixinta cusub ee Christchurch oo ka socdo Wasaaradda Horumarinta Arrimaha Bulshada ee (MSD). Waxaad u baahnaaneysaa inaad heshid xaqiijin caafimaad oo ka socota dhakhtarkaaga ama la taliyaha caafimaad. Waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan ku caawino inaad bixisid qarashkan, sidaa darteed fadlan nagala hadal arrintan.

Dulmar xogta hoose.



Qayb taageerada lacageed ah, waxaan qiyaasnaa qiimeynta hantidaada marka aan xisaabeyno lacagaha aad heli kartid.



Lacagaha cusub ee loogu talagalay dadka ay saameeyeen weeraradii masaajidda

Waxaan soo kordhinay lacago cusub oo todobaad walbo ay siineyso MSD dadka ay saameeyeen weeraradii masaajidda oo aan u qalmin lacagaha kale. Lacagaha weerarada Masaajidda Christchurch waxaa la heli karaa laga bilaabo **3-da Juun**. Lacagaha waxaa lasii bixin karaa ilaa hal sano.

Imisaan heli karaa?

Qiyaasta lacagta aad heli kartid waxay ku xiran tahay xaaladdaada iyo dakhli kaloo walbood heshid. Waxaad heleysaa tira isku mid ah todobaad walba laakiin waxaa laga yaabaa tani in ay ka duwanaato haddii xaaladaadu ay isbedesho. Si joogta ah ayaan kuula xiriiri doonaa si aan u hubino inaad heleysid dhammaan taageerada aan kuugu siin karno xaaladaada.

Waxaa laga yaabaa inaad heshay lacago lagu soo mariyay hay'ado qeybinaaya deeqo loogu tala galay dadkii ay saameeyeen weeraradii masaajidda – tani looma xisaabaayo dakhli ahaan ama hanti marka aan xisaabeyno qiyaasta aad heli kartid.

Sidaan u codsadaa?

Haddii aad leedahay maamule kiis, kala hadal taageerada laga yaabo inaad heli kartid adiga iyo qoyskaaga.

Haddii aadan lahayn maamule kiis, fadlan wac **0800 559 009**.

Haddii aadan hubin inaad u qalantid, fadlan nasoo si uuga wada hadalno. Xitaa haddii aadan u qalmin, waan eegaynaa haddii ay jiraan qaabab kaloon kuugu caawino.

Waxaan qorsheyn karnaa qof kuugula hadlo afkaaga. Na ogeysii markaad na soo wacdid.

Haddii adiga ama qoyskaaga aad u baahan tihiin tageerada maamule kiis fadlan soo wac **03 961 9257**
ama iimeyl u soo dir support@msd.govt.nz